



## Qoysaska PPS: Naga caawi in aanu wanaajino dhaqanka iyo jawiga dugsiga adiga oo qaadanaya Ra'yi ururinta Dugsiyada Guusha leh

Haddii aad tahay waalidka ama mas'uulka arday dhigta Dugsiyada Dadweynaha Portland, naftaada weydii: Waa maxay jawiga waxbarasho ee dugsigu? Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay raadinayaan jawaabo loogu talagalay tani iyo su'aalaha kale ee muhiimka ah oo laga helo xubnaha qoyska ee ardayda PPS iyada oo ay qayb ka tahay Ra'yi ururinta Dugsiyada Guusha leh. Ardayda fasallada 5, 7 iyo 10 ayaa sidoo kale ra'yi ururin laga qaaday, iyaga oo shaqaalaha dugsiga ku saleysan ay ka qayb qaadan doonaan laga bilaabo Febraayo, 19.

Waalidiinta iyo mas'uuliyiintaay, waxaan u baahanahay jawaab celintiina iyada oo ra'yi ururintu tahay shay muhiim ah u wareegista aan u wareegayno isticmaalka xogta si loo gaaro go'aano laga warqabo ee ku saabsan jawiga iyo dhaqanka dugsiga. Qaybtaada ardaydu ra'iyi ururinta, oo si buuxda aanu magac ula socon, waxay ka hadli doontaa mawduucyada ku saabsan dugsiga ilmahaaga:

- Ku haboonaanta dugsiga
- Jawiga dugsiga
- Caqabadaha la xiriira ka qayb qaadashada
- Ammaanka dugsiga

Qoysasku waxay ra'iyi ururinta ka qaadan karaan internet-ka iyaga oo adeegsanaya [website-ka ra'yi ururinta](#), halkaasi oo qaybaha uu ka kooban yahay la heli karo isaga oo ku qoran Ingiriisi, Isbaanish, Vietnamese, Chinese, Russian iyo Soomaali. Qoysaska aan heli karin kambiyuutar waxay ra'iyi ururinta ku qaadan karaan qayb daabacan. Fadlan nuqul/koobi ka codso xafiiska dugsigaaga.